

## **Jeermiska ”Campylobacter”, warbixinta bukaanka 2004-07-01**

**Warbixinta bukaanka iyo asluubta hab-dhaqanka. Warqadda warbixinta ee takhtarka badbaadinta cudurrada lays qaadsiyo.**

### **Waa maxay infekshanka jeermiska ”campylobacter”?**

Waxaa lagugu daartay jeermiska caloosha ee lo yaqaanno ”Campylobacter”. Astamaha jeermiskaan waxaa kamid ah shuban (kolkol dhiig leh), caloolxannuun, qandho iyo matag. Caadi ahaan astamahaas waxay ciribtirnaan hal toddobaad gudahiisa. Laakinse jeermis keenaha wuxuu caloosha ku hari karaa dhowr toddobaad. Bukaanka caadi ahaan wuu ka bogsada cudurka, marmar dhif ah ayaa lagu daaweeyaa antibioticada.

### **Jeermiska wuxuu ku jira caloosha**

Markii u ku haayo caloolbax, waxaa jirto halis aad cudurka ku faafiso, taaso u sabab ah jeermiska tirada badan ee saxaarada la socdaan. Caadi ma aha in qof agagaarka bukaanka ku nool uu cudurka ku faafo. Haddii aad loo ilaaliyo nadaafada gacanta iyo musqusha waxaa hoos loo dhigi karaa halista faafinta infeekshanka. Xayawaanno badan – kuwa guri- iyo duurjoogga ba, siiba shimbiraha, xitaa lo’da, qansiirka, eeyga iyo gnaagnuurta waxay sidi karaan jeermiska ”Campylobacter”. Infeekshanka waxaa caadi ahaan laysku gudbiyaa haddii la adeegsado isla cuntada ama cabbitaanka jeermisyada leh. Jeermisyada waxay ku ciribtirnaan kuleelka, sidaas awgeed raashinka sii fiican loo kariyay ama loo dubay mal aha halis. Waa haddii laga fogeeyo mindiyaha iyo alwaaxa raashinka lagu jarjaro oo sii fiican loo nadiifin.

Haddii aad ka shaqeyso laamaha daryeelka / xannaanada ama raashinka, waxaa xaaladaas muhim ah in xilliga caloolbaxa aad aqalkaaga iska joogto ama ilaa saxaarada ay caadi noqoto. Waa in isla sidaas u dhaqmaan carruurta dhigata xanaanada / dugsiyada biloowga.

Sida hadba ku xusan Xeerka Raashinka waxaa ku xilsaaran inaad shirkadda aad u shaqayso wargeliso cudurka lagugu daartay, haddii aad ka shaqayso goob raashinka aanan baakada ku jirin lagu habeeyo ama lagu diyaariyo.

### **Sida loogu hortago in cudurka aadan faafin waa inaad u dhaqanta sida hoose ku xusan:**

*\* Ha shaqayn xilliga aad caloolbaxayso.*

*\* Gacmaha sii fiican isaga dhaq, booqashada musqusha kadib.*

*\* Ku isticmaal saabuun adiga ku gaar ah, siiba kuwa biya-biyaha ah, ku isticmaal shukumaan adiga ku gaar ah.*

*\* Haddii cunug suufka loo xiro u cudurku ku dhaco, waa in gacmaha sii fiican laysaga dhaqa mar kasto oo suufka cunuga buko laga beddelo. Si wanaagsan loo nadiifiyo miiska sufka looga beddelo. Suufka lagu isticmaalay waa in bac la geliyaa, markaas kadib loo tuura sida qashin oo kale. Markaas kadib Gacmaha sii fiican isaga dhaq.*

Talooyin dheeraad ah ee ku saabsan nadaafad-shaqsiyeedka, waxaad ka akhrisan kartaa warqadda warbixinta ee takhtarka badbaadinta cudurrada lays qaadsiyo ”Hygienråd vid tarmsmitta” oo aad ka heli karto takhtarkaaga.

**smittskyddsenheten**

Centrallasarettet, 351 85 Växjö. ☎0470-588278